WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2021

# AF-SOOMAALI

20
21

XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA

SomExams

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Maamulka Gobolka Banaadir
Agaasinka Waxbarashada

جمهورية الصومال الفيدرالية
ادارة محافظة بنادر
مديرية التعليم

Federal Republic of Somalia
Banadir Regional Administration
Education Directorate

Xafiiska Imtixaanaadka & Shahaadooyinka

## SHAHAADADA SOOMAALIYEED EE TACLIINTA

| FASALKA | 8AAD | MAADDO | AF-SOOMAALI | SANAD | 2020-2021 |
|---|---|---|---|---|---|

| | |
|---|---|
| **Magac Afaran:** | |
| **Rool Lambar:** | |
| **Dugsiga:** | |
| **Xarunta:** | |

**Fadlan u akhri tilmaamaha si kaadsiiyo leh kahor inta aadan ka jawaabin su'aalaha:**

- Ku qor meelaha u bannaan magaca oo dhammeystiran, roollambar, dugsiga iyo xarunta.
- Ka jawaab dhammaan su'aalaha. Su'aashii aan laga jawaabin lama saxayo.
- U qor si muuqata, kuna qor qalin leh qad buluug ah.
- Isku day in aad ka jawaabto dhammaan su'aalaha imtixaanka.
- Ku toosnow dhammaan shuruucda imtixaanka iyo waqtiga loo xaddiday.

Hubi in imtixaanku ka koobanyahay 7 Bog oo daabacan

7



www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

## QAYBTA KOOWAAD: SHEEKO (CAQLIGA WANAAGSAN)

**SI DEGGAN U AKHRI SHEEKADAAN SI AAD U FAHANTO MACNAHA KU JIRA.**

Kaafi waxaa uu isu haystay inuu yahay nin taajir ah. Waxaa uu haystay lacag badan.

Adeerkii oo dibedda jiray ayaa lacag u ballan qaaday, haddii uu keeno imtixaanka dhibco wanaagsan. Waxaa dhacday nasiib wanaag in uu fasalka ugu dhibco sarreeyey.

Markii uu adeerkii u direy E-mail, ayaa adeerkii waxaa uu ugu soo jawaabay in uu u soo diro lacag dhan 750 Dollar.

Kaafi waxaa uu ku dhambacaadsaday sariirtiisii isaga oo ka fekeraya wixii uu ku qabsan lahaa lacagta. Waxaa uu ku soo gadan karaa lacagtaas Kumbiyuutar, raadiye, rikoor iwm.waxaa uu soo iibsan karaa saacad cusub, dhar cusub iyo waxyaabo kale oo qaali ah. Waxaa uu soo iibsan karaa saddex halaad. Kaafi ma uu dooneyn geel, na uusan dooneyn inuu noqdo beeraley.

Waxaa uu doonayey in uu dugsi sare billaabo oo uu waxbarto, dabadeedna uu jaamacad aado, markaas dabadeedna waxaa uu bulshada dhexdeeda ka noqon doonaa nin magac leh.

Kaafi walaalkiisa ka weynaa ayaa u yeeray oo ka codsaday in uu eeddadiisa gaarsiiyo farriin muhiim ah. Kaafi waxaa uu ka booday sariirtii uu ku fadhiyey, dabadeedna waa uu is dejiyey, waxaana uu yiri, "Nin heysta lacag 750 Dollar, side ayaa uu u qaadayaa farriimo, oo uu meelaha u socsoconayaa?"

Waxaa ay ahayd in uu walaalkii u sheego in uu yahay mashquul oo sidaa ka dhigto marmarsiinyo. Maya! Ma aysan fiicneyn, waxaa ay aheyd Kaafi in uu walaalkiisii ka weynaa aanu war ka diidin. Ugu dambeyntii, farriintii waxaa uu gaarsiiyey eeddadiis oo uu aad u jeclaa ee uu ka heli jirey la joogiddeeda.

Markii uu u socdey gurigii eeddadiis, orad ayaa uu ku maray jidka, laakiin markii uu gurigii u sii dhowaaday ayaa uu billaabay in uu u socdo si tartiib ah, waxaa uuna yiri, "Nin heysta lacag 750 Dollar, ma ahan in uu u socdo si degdeg ah". Jidkii ayaa waxaa uu ugu socdey sidii nin xarragoonayo oo kale. Waxaa uu doonayey in uu qeyliyo oo uu u sheego adduunka oo idil in uu ka fiicanyahay dadka kale, maadaama uu yahay nin taajir ah. Maya! taasi waa fekrad xun.

Waxaa suuragal ah in uu lacagta wax ka siiyo saaxiibbadiis, sababta oo ah waxaa uu heysta lacag ku filan qof walba. Waxaa uu marti qaadi kareyey saxiibbadii. Dabadeed qof walbaa waxaa uu ogaanayaa in Kaafi uu yahay nin weyn oo waxtara bulshada. Isla markiiba waxaa uu gaaray guriga eeddadiis. Markii uu eeddadiis farriintii gaarsiiyey ka dib, waxaa uu ceshan waayey sirtiisii, waxaa uuna u sheegay eeddadiis lacagtii iyo qorshayaasha



☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

uu u hayo in uu ku bixiyo. Markii uu dhammeeyay hadalkii, ayaa eeddadiis ku qososhay oo ay weydiisay sababta qorshihiisa uu ugu dari waayey guri iyo xaas. Guriga eeddadiis waxaa joogay wiil kale oo Kaafi la dhashay. Waxaa uu arkey Kaafi in walaalkii iyo eeddadiisa ay ku qoslayeen.

Maxaad ku sameynaysaa lacagta? Waxaa weydiiyey walaalkiis, waxaa uu ku yiri Kaafi haddane, "haddii aan haysan lahaa lacag intaad la`eg, waxa aan dhigan lahaa meel aan cidna iga taabaneyn oo ay ku nabad galeyso".

Kaafi waxaa uu yiri, "xaggee weeye meesha la dhigto lacagta?". Walaalkiis ayaa ugu jawaabay, "Waxaa la dhigtaa Bangiga". Kaafi waxaa uu ka fekeray arrintaan, waxaa uuna yiri, "laakiin haddii aan dhigto lacagta bangiga, ma aan isticmaali karo, qof ogna ma jirto in ay lacagtu bangiga ii taal". Maxaa tiri? Lacagta adiga ayeey kuu taallaa, waqtigii aad doontana waad isticmaali kartaa.

Ka warran waxyaabihii aad ku riyooneysay? Waxa aan u maleynayaa in aad dooneyso in aad gasho Jaamacad. Haddii aad hadda dhigato bangi Islaam, waa ay kuu kaydsamaysaa mustaqbalka.

**Goobo geli weerahaan soo soocda xarafka muujinaya jawaabta saxda ah. (40 dhibcood).**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Kaafi, waxaa uu billaabay in uu tartiib u socdo markii uu | | | |
| | a) jidka marayey | b) guriga u dhowaaday | c) arkayey eedadiis | d) la siiyey lacagta |
| 2 | Waxaa ka codsaday Kaafi in uu farriinta muhiimka ah eeddadiisa gaarsiiyo | | | |
| | a) walaalkiis | b) Aabbihiis | c) adeerkiis | d) hooyadiis |
| 3 | Kaafi, waxaa uu isu heystay in uu yahay nin | | | |
| | a) maskiin ah | b) faqiir ah | a. taajir ah | c) fataal ah. |
| 4 | Kaafi, markii uu ka fakarayey, waxaa uu lacagta ku qabsan lahaa waxaa uu joogay | | | |
| | a) guriga adeerkiis | b) sariirtiisa | c) bannaanka | d) jidka |
| 5 | Kaafi, waxaa uu jidka ugu socdey sidii nin | | | |
| | a) cabsanaya | b) qeylinaya | c) ordaya | d) xarragoonaya |
| 6 | Wiilka waxaa uu doonayey in uu adduunka u sheego in uu ka fiicanyahay | | | |
| | a) dadka kale | a. walaalkiis | b) eeddadiisa | c) aabbihiisa |
| 7 | Kaafi, adeerkii waxaa uu u ballan qaaday in uu | | | |
| | a) dibedda u wadayo | b) dhibco fiican siinayo | c) lacag siinayo | d) waxbarayo |



10

☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 8 | Kaafi lacagtiisii waxaa uu ku soo iibsan kareyey | | | |
| | a) Ari iyo geel | b) kombiyuutar iyo raadiye | c) lo' iyo ari | d) kaamiro iyo mobil |
| 9 | Kaafi, waxaa uu ku fekeray in uu noqon doono nin magac leh marka uu dhammeeyo | | | |
| | a) Jaamacadda | b) dugsiga sare | c) dugsiga dhexe | d) dugsiga quraanka |
| 10 | Kaafi, waxaa uu u arkayey in uu hantidiisa u sheego dadka fekrad | | | |
| | a) fiican | b) xun | c) Qatar ah | d) wax dhisaysa. |
| 11 | Wiilkii taajirka isu haystay in uu lacagtiisa bangiga dhigto waxaa kula taliyey | | | |
| | a) adeerkii | b) aabbihii | c) walaalkii | d) saaxiibbadiis |
| 12 | 1. "Haddii aan lacagtaas haysan lahaa, waxaan dhigan lahaa meel fiican"waxaa sidaa yiri Kaafi: | | | |
| | a) aabbihii | b) abtigii | c) adeerkii | d) walaalkii |
| 13 | Kaafi, sirtii uu ceshan waayey waxaa uu u sheegay | | | |
| | a) walaalkiisa | b) aabbihiisa | c) adeerkiisa | d) eeddadiisa |
| 14 | Ugu dambeyn wiilku waxaa uu aad u jeclaystay in uu lacagtiisa dhigto | | | |
| | a) ayuuto | b) bangi | c) shirkad | d) ganacsi |
| 15 | "Taasi way sahlantahay sida loo furan karo buugga bangiga" sidaa waxaa yiri Kaafi | | | |
| | a) walaalkii | b) agaasimaha | c) adeerkii | d) aabbihii |
| 16 | Cinwaanka sheekadaani waa | | | |
| | a) Kaafi iyo walaalkii | b) Caqliga wanaagsan | c) Lacagtii badneyd | d) Kaafi iyo bangigii. |
| 17 | "Inna keen hadda inta aan maskaxdeydu is beddelin" sidaas waxaa yiri | | | |
| | a) Agaasimihii | b) Walaalkii | c) Kaafi | d) Adeerkii |
| 18 | Kaafi in lacagta la keydsado waxaa baray | | | |
| | a) Agaasimaha | b) Walaalkii | c) Adeerkii | d) Aabbihii |
| 19 | Lacagta Kaafi loo soo dhiibay waxaa ay gaareysay | | | |
| | a) 570 Dollar | b) 705 Dollar | c) 507 Dollar | d) 750 Dollar. |



☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 20 | Kaafi, waxaa uu adeerkiisa u diray | | | |
| | a) E-mail | b) Taleefan | c) Fax | d) Boosto |

1. QAYBTA LABAAD: NAXWE.
2. **Goobo-geli weerahaan soo socda xarafka muujinaya jawaabta saxda ah. (40 dhibcood).**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Xiriiriyayaalka shardileydu waa | | | |
| | a) Shan qaybood | b) Laba qaybood | c) Saddex qaybood | d) Todoba qaybood |
| 2 | " Marka aad daashaan, waad nasataan" hawraartaani waa | | | |
| | a. Gooreyn tagto | b) Gooreyn joogto | c) Gooreyn diidmo | d) Gooreyn weydiimo |
| 3 | Tusaalahaani "Axmed cashar ayuu qorey" waxaa uu muujinayaa fal | | | |
| | a) ahaansho | a. kal-kaaliye | b) gudbe | c) ma-gudbe. |
| 4 | "Bisaddu jiir bay dishay", erayga Bisad waa | | | |
| | a) yeele | b) la yeele | c) gudbe | d) ma-gudbe |
| 5 | Tusaalahaani, "Wiilku wuu wanaagsanyahay" wuxuu ina tusayaa | | | |
| | a) Sifo ebyan | b) sifo caadi ah | c) sifo xulasho | d) sifo isbar-bardhig |
| 6 | "Axmed wuu seexday" falka ma gudbaha ah ee meesha ku jiraahi waa | | | |
| | a) Axmed | b) seexday | c) day | d) wuu |
| 7 | "Ninku Libaax buu dilay"yeelaha meesha ku jira waa | | | |
| | a) Libaax | b) dilay | c) buu | d) ninku |
| 8 | Fal gar-gaarayaashu waxaa ay u kala baxaan ............................kooxood. | | | |
| | a) afar | b) saddex | c) todoba | d) shan |
| 9 | Yeele iyo la yeele, waxaa ay ku yimaadaan fal | | | |
| | a) gudbe | b) ahaansho | c) gar-gaare | d) ma-gudbe |

14



☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 10 | "Kismaayo waan tegi doonaa" erayga doonaa waa fal | | | |
| | a) ma-gudbe | b) gudbe | c) kal-kaaliye | d) ahaansho |
| 11 | " gabadhu way qurux badan tahay" sifada meesha ku jirta waa | | | |
| | a) gudbe | b) isbar-bardhig | c) xulasho | d) caadi ah |
| 12 | "Geelaani waa ka badan yahay geelaas" hawraartaani waa sifo | | | |
| | a) caadi ah | b) xulasho | c) isbar-bardhig | d) lahaansho |
| 13 | Sida wanaagsan ee afka loogu dhawaaqo, loona qoro waxaa loo yaqaanaa | | | |
| | a) naxwe | b) sifo | c) fal | d) magac |
| 14 | Erayga nin marka aan rabno in aan kooxeyno, waxaan u qori karnaa | | | |
| | a) nimanyaal | b) niman | c) nimanyaalo | d) nimanyaalooyin |
| 15 | Shayga ku tusiya heerka ugu sarreeya ama ugu hooseeya waxa laga hadlayo waa sifo | | | |
| | a) xulasho | b) isbar-bardhig | c) ahaansho | d) caadi ah. |
| 16 | Sifo tayeed waa sifo loo adeegsado in ay caddeyso ama wax ka sheegto | | | |
| | a) magac iyo magac-uyaal | b) fal iyo falkaab | c) falkaab iyo sifo | d) sifo iyo fal |
| 17 | Erayga wax muujiya ama war bixin buuxda kaa siiya falka waxaa la yiraahdaa | | | |
| | a) falkaab | b) sifo | c) magac | d) magac-uyaal. |
| 18 | Erayadaani "oo, ee iyo mise" waxaa la yiraahdaa | | | |
| | a) falkaabyo | b) magacyo | c) sifo | d) xiriiriyeyaal |
| 19 | Hawraarradaani soo socda keebaa ah Fal ma-gudbe | | | |
| | a) Cali wuu seexday | b) Cali libaax buu dilay | c) Cali ayaa xoolaha leh | d) Cali koob buu qaaday |
| 20 | "Faadumo waxaa ay akhrineysaa buug" falka meesha ku jira waa | | | |
| | a) Faadumo | b) akhrineysaa | c) buug | d) waxaa ay |



☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

## QAYBTA SADDEXAAD: ERAYO.

Isugu aaddi erayada sida ay isugu macnaha yihiin adigoo adeegsanaya tiro: (20 dhibcood).

| Tirsiga | Erayga | Jawabta | Macnihiisa |
|---|---|---|---|
| 1) | Xoodiyo | | Nooc ka mid ah macdanta qaaliga ah |
| 2) | Dhaxeeye | | Laboodka yar ee geela |
| 3) | Alhuumeeyay | | Iga sarreyn karo |
| 4) | Tamar | | La wada leeyahay |
| 5) | Khasnad | | Wax leysku xirxiro oo dadka lagu aafeeyo |
| 6) | Luul | | Salaaxo |
| 7) | Caado | | Neef hal aan hooyadii ahayn lagu maalo |
| 8) | Sanku neefle ma ogoli in uu | | Xoog |
| 9) | Sidko | | Sanduuq keyd |
| 10) | Qurbac | | Ibtileeyay |

16



16

☞ www.somexams.com ֍ info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com